# الأسباب الظاهرة والباطنة لرفع البلاء، ووجوب طاعة ولي الأمر

# Sababaha muuqda iyo kuwa qarsoon oo balada lagu qaado iyo inay waajib tahay daacada madaxda

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ku yiri:

{رَبَّنَا عَلَيْكَ تَوَكَّلْنَا وَإِلَيْكَ أَنَبْنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ}

(**Ilaahayow adaan ku talasaaranay, adaanna kuu toobad keennay xaggaagaanna loo noqon (Aakhiro)**).

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Imtaxaanka wuxuu ka mid yahay sunnooyinka Alle (cazza wajalla) ee khalqiga, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{إِنَّا خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ مِنْ نُطْفَةٍ أَمْشَاجٍ نَبْتَلِيهِ فَجَعَلْنَاهُ سَمِيعًا بَصِيرًا}

(**Annagaa ka abuuray dadka dhibic isku Dheehan, Imtixaan Dartiis, waxaana ka yeellay wax maqle wax arka ah**).

Alle wuxuu u sameeyay qaadidda balada sababo muuqda iyo kuwa qarsoon, sababaha muuqda oo ay waajib tahay in dhab ahaan loo qaato - iyadoo laga soo qaadayo wax kaste inay yihiin - waa sababaha cilmiga iyo dadaalada dadka takhasuska leh, iyo in la fuliyo fariimaha kasoo baxaya mu'asasooyinka dowladda rasmiga, in a adeeco madaxda iyo dadka iyaga matala oo ka mid ah mu'aasooyinka dowladda ee wadaniga waa waajib, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu wataacaa:

**{أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الأَمْرِ مِنْكُمْ}**

(**Adeeca Eebe oo Adeeca Rasuulka iyo kuwa Amarka leh**), wuxuu leeyahay Alle:

**{فَاسْئَلُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِنْ كُنْتُمْ لا تَعْلَمُونَ}**

(**Ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogayn**).

Ahlu digriga waxaa laga wadaa dadka takhasuska u leh aqoon, waxaa waajib ah marka inaan laga kor boodin mu'asasooyinka dowladda wixii takhasuskooda ah.

Waxaa ka mid ah sababaha muuqda: in lagu dadaalo nadaafadda, islaamka aad buu ugu dadaalay nadaafadda guud ahaan wuxuuna ka dhigay mid daruuri ah qofka si

looga ilaaliyo jirrooyiinka iyo dhibaatooyinka, wuxuu leeyahay Alle:

{إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَّابِينَ وَيُحِبُّ الْمُتَطَهِّرِينَ}

(**Ilaahayna wuxuu jecel yahay kuwa toobadda badan, wuxuuna jecel yahay kuwa isdaahiriya**), wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(الطُّهُورُ شَطْرُ الإِيمَانِ...)

(**Dahaarada waa iimaanka barkiisa...**), wuxuu leeyahay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(طَهِّرُوا أَفْنِيَتَكُمْ)

(**Bannaankiisa dahiriya**).

Waxaa laga wadaa guriga bannaankiisa iyo dugsiga iyo warshada iyo waddooyinka iyo goobaha oo dhan, sidoo kale islaamka wuxuu ku dadaalay in gacmaha si gaar loo dhaqo siiba xilliga weysada, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا قُمْتُمْ إِلَى الصَّلَاةِ فَاغْسِلُوا وُجُوهَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ إِلَى الْمَرَافِقِ وَامْسَحُوا بِرُءُوسِكُمْ وَأَرْجُلَكُمْ إِلَى الْكَعْبَيْنِ وَإِنْ كُنْتُمْ جُنُبًا فَاطَّهَّرُوا}**

(**Kuwa (xaqa) Rumeeyow Haddaad u Kacdaan Salaadda Dhaqa Wajiyadiina, iyo Gacmihiinna Tan iyo Jiqilka (Xusulka) Masaxana Madaxiinna (Dhaqana)**

**Lugihiina Tan iyo anqawyada haddaad Janaabo qabtaan isdaahiriya**).

Gacmaha iyo xusulada in la dhaqo waa waajib ka mid ah waajibaadka weysada, waxaa lagu darayaa arrinkaas inay sunno tahay marka weysada la bilaabayo in gacmaha seddex jeer la dhaqo kaddib waxaa la raacinayaa luqluqasho iyo sandaarsi, in wajiga la dhaqo kaddib gacmaha in la dhaqo mar kale iyagoo xusulada ay la jiraan waa waajib, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(**إِذَا اسْتَيْقَظَ أَحَدُكُمْ مِنْ نَوْمِهِ فَلا يُدْخِلْ يَدَهُ فِي الإِنَاءِ حَتَّى يَغْسِلَهَا ثَلاثًا**)

(**Midkiina markuu kasoo tooso hurdadiisa yuuna galinin gacantiisa weelka ilaa uu seddex jeer ka dhaqo**).

Sidoo kale waxaa sunno ah in gacmaha la dhaqo cuntada kahor iyo marka la cuno kaddib, taas waxay adkaynaysaa inaysan iska hor imaanaynin diinta iyo cilmiga, in la ilaaliyo caafimaadka aadanaha, waxay ka mid tahay hadafka diinta, wuxuu leeyahay rasuulka:

(**لاَ ضَرَرَ وَلاَ ضِرَار**)

(**Dhib ma jiro is dhibna ma jiro**).

Waxaa waajib ah in la raaco dhammaan fariimaha is ilaalinta sidii looga hortagi lahaa faafidda cudurada iyo jirrooyinka, waxaa ka mid ah in la joojiyo isqoorgalinta iyo dhunkashada iyo isgacangalinta iyo in laga fogaado meelaha lagu kulmo.

Waxaan adkaynayanaa dhibaatooyinka iyo meelaha halista ah waxay muujinayaan dadka fiican iyo akhlaaqdooda, waxaa waajib nagu ah inaan isu naxariisano oo aan ka fogaano nafjeclaysiga iyo dhammaan in ixtikaar lagu sameeyo badeecadaha si qiimahooda kor loogu qaado, ama si hunguriweyni leh loo iibsado taasoo keeni karta inay hallayso iskudheellitirnaanta suuqa, wuxuu leeyahay rasuulka:

(**لاَ يَحْتَكِرُ إِلاَّ خَاطِئٌ**)،

(**Ma xayiro badeecada qof qaldan mooyee**), wuxuu leeyahay:

(**الْمُحْتَكِرُ مَلْعُونٌ**)

(**Kan xayiraya badeecada waa qof lacnad qaba**), wuxuu leeyahay:

(**لا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّى يُحِبَّ لأَخِيهِ مَا يُحِبُّ لِنَفْسِهِ**).

(**Midkiina ma rummeeyo ilaa uu walaalkiisa ula jeclaado wuxuu naftiisa la jecel yahay**).

## Khudbada labaad

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha oo ah sayidkeena Muxamed iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo kuwa raacay.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Sababaha qarsoon oo ay habboon tahay inay horteena yaallaan waxaa ka mid ah: si fiican in Alle loo talasaarto, wuxuu leeyahay Alle:

**{فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ}**

(**Alle talasaaro Alle wuxuu jecel yahay kuwa isaga talasaarta**).

in Alle la talasaarto kama horimaanayso in lala yimaado sababaha, nin ayaa yiri: ma dabraa oo ma talasaartaa ama waa sii deeyaa oo waan talasaartaa? - wuxuu ula jeeday hashiisa - wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(اعْقِلْهَا، وَتَوكّلْ)**

(**Dabar oo talasaaro**).

Waxaa nagu waajib ah hadeer inaan sababaha caafimaadka aan qaadano, iyo dadaalada cilmiga lagu kalsoon yahay, kaddib arrinka aan u celino Alle oo gacantiisa wax kaste ay ku jiraan, taas waa talasaarasho ee ma aha isku hallayn.

Waxaa ka mid ah: ducada iyo in Alle (cazza wajalla) aad loo tuugo, wuxuu leeyahay Alle:

**{فَلَوْلَا إِذْ جَاءَهُم بَأْسُنَا تَضَرَّعُوا}**

(**Maa Markuu u Yimaaddo Dhibku ay baryaan (Eebe)**).

Maxaa inooga baahi badan inaan si dhab dhammaanteena u tuugno Alle inuu ka qaado balada dhammaan dalalka iyo addoomaha oo dhan, oo ay noqoto fursad mid kaste uu naftiisa kula xisaabtamo xaga xiriirka rabbigiisa.

Waxaa ka mid ah qofka inuu naftiisa ku ilaaliyo digriga Alle wuxuu leeyahay rasuulka:

**(مَا مِنْ عَبْدٍ يَقُولُ فِي صَبَاحِ كُلِّ يَوْمٍ وَمَسَاءِ كُلِّ لَيْلَةٍ: بِسْمِ اللهِ الَّذي لا يَضُرُّ مَعَ اسْمِهِ شَيْءٌ فِي الأَرْضِ وَلا فِي السَّمَاءِ وَهُوَ السَّمِيعُ العَلِيمُ، ثَلاثَ مَرَّاتٍ، فَيَضُرَّهُ شَيْءٌ)**

(**Addoon ma jiro oo oranayo maalin walba iyo habeen kasta: magaca Alle ayaan qabsanayaa kaasoo magaciisa la jirkiisa dhulka iyo cirka aan dhib lagala**

**kulmaynin waana midka maqla oo aqoon badan seddex jeer, (hadduu dhaho) ma dhacayso inuu wax dhibo**), wuxuu leeyahay:

**(مَنْ نَزَلَ مَنْزِلاً ثُمَّ قَالَ: أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللهِ التَّامَّاتِ مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ لَمْ يَضُرَّهُ شَيْءٌ حَتَّى يَرْتَحِلَ مِنْ مَنْزِلِهِ)،**

(**Qofkii meel dego kaddib yiraahdo: kalmadaha Alle oo dhammaystiran ayaan ka magangalayaa wixii shar ah uu abuuray, wax dhibayo ma jiro ilaa uu meesha kaga rarto**).

Waxaa ka mid ah sadaqada: wuxuu leeyahay rasuulka:

**(حَصِّنُوا أَمْوَالَكُمْ بِالزَّكَاةِ، وَدَاوَوْا مَرْضَاكُمْ بِالصَّدَقَةِ، وَأَعِدُّوا لِلْبَلاءِ الدُّعَاءَ)**

(**Hantidiina ku ilaaliya sakada, bukaankiinana ku daaweeya sadaqada, balada duco u diyaarsada**).

**Ilaahayow nagu dar kuwa aad caafisay, iyo kuwa aad xiriirisay, naga kori nagana leexi wixii aad xukuntay shartiisa, dalkeenana noo ilaali iyo dhammaan dalalka caalamka.**